

**OGEYSIISKA DADWAYNAHA
MAAMULKA GURIYEYNTA EE ISMAAMULKA SAN DIEGO**

**QORSHAHA WAKAALADA GURIYAYNTA DADWAYNAHA
QORSHAHA SANADLAHA AH EE SANAD MIISAANIYADEEDKA 2023-2024**

Ogeysiis ayaa halkaan looga shaacinayaa in Gollaha gudoomiyaasha Maamulka Guriyaynta ee Ismaamulka San Diego uu qaban doono dhageysi dadwayne marka la gaaro Abriil 5, 2023, saacaduna ay tahay 9:00 a.m. laguna qaban doono Qolka 310 ee County Administration Center, 1600 Pacific Highway, San Diego, CA. Tallooyinka dadwaynaha ayaa lagu dhagaysan karaa Qorshaha Sanadlaha ah ee lasoo jeediyay ee Sanad Miisaaniyadeedka 2023-2024, Diiwaan gelinnada Guriyaynta Dadwaynaha iyo Xeerka Sii wadista Daganaansha, iyo Qorshaha Maamulka ee Boonada Guriyaynta ee Dookha Guriyaynta. Marka la gaaro Febraayo 17, 2023, Qorsheyaasha lasoo jeediyay ayaa la faafin doonaa si loogu sameeyo 45 maalmood oo fikir aruurinta bulshada ah iyo mudada talo dhiibashada.

Tallooyinka dadwaynaha ayaa lagu dhagaysan karaa Qorshaha Sanadlaha ah ee lasoo jeediyay ee Sanad Miisaaniyadeedka 2023-2024, Diiwaan gelinnada Guriyaynta Dadwaynaha iyo Xeerka Sii wadista Daganaansha, iyo Qorshaha Maamulka ee Boonada Guriyaynta ee Dookha Guriyaynta. Qorshaha Wakaalada Guriyaynta Dadwaynaha (PHA) waa tusmo balaaran oo ku aadan xeerarka, barnaamijyada, shaqooyinka, iyo xeeladaha buuxinta baahiyaha iyo yoolalka guriyaynta ee maxaliga ah. Diiwaan Gelinnada Guriyaynta Dadwaynaha iyo Xeerka Sii Daganaanshaha Guriga iyo Qorshaha Maamulka ee Qaybta 8 ayaa ah dukumiintiyada maamulaaya diiwaan gelinta PHA ee barnaamijka guriyaynta dadwaynaha iyo barnaamijka Qaybta 8.

Qaab toos looga qaybgalaayo ah, xubnaha bulshada ayaa aad loogu boorinayaa inay soo gudbiyaan faallooyinkooda ku aadan Qorshaha Sanadlaha ah ee Wakaalada Guriyaynta Dadwaynaha ee Sanad Miisaaniyadeedka 2023-2024, Diiwaan Gelinnada Guriyaynta Dadwaynaha iyo Xeerka Sii Daganaanshaha Guriga iyo Qorshaha Maamulka ee Qaybta 8 oo lagu diraayo iimeelka publiccomment@sdcounty.ca.gov. Dhammaan faallooyinka lasoo gudbiyo ayaa loo diraa xubnaha Golaha Gudoomiyaasha iyo Madaxa Maamulka si ay uga baaraan dagaan. Fikradaha ayaa la aqbali doonaa ilaa dhammaad kulanka.

Biloowga Febraaya 17, 2023, dukumiintiyada la tixraacay iyo dukumiintiyada taageeraaya ayaa si degdeg looga heli karaa barta www.sdhcd.org waxaana loosoo bandhigi doonaa si dib u eegis loogu sameeyo meelaha soo socda:

Ismaamulka San Diego
Adeegyada Horumarka Bulshada iyo Guriyeynta
(Housing and Community Development Services)
3989 Ruffin Road
San Diego, CA 92123

Melrose Manor Apartments
1678 Melrose Ave., Apt. 13
Chula Vista, CA 91911

Towncentre Manor Apartments
434 F St., Apt. 101
Chula Vista, CA 91911

L St. Manor Apartments
584 L St., Apt. F
Chula Vista, CA 91911

Dorothy St. Manor Apartments
778 Dorothy St., Apt. A
Chula Vista, CA 91911

Adeegyada Guriyaynta iyo Hormarinta Bulshada
Webseedka: www.sdhcd.org

Faalooyinka qoraalka ah ayaa loo diri karaa dhagaysiga dadwaynaha iyo inta lagu jiro muddada talo bixinta ee 45 maalmood ah oo dhammaanaysa Abriil 5, 2023 oo loo diraayo:

Ismaamulka San Diego
Housing and Community Development Services
Attn: Monique Mercier
3989 Ruffin Road,
San Diego, CA 92123